



**Warbixin ku saabsan  
gaadiidka iskuullada**

**Ubadkaaga waxaa loo oggolaaday gaadiidka iskuullada. Sidaas awgeed, waxaad qoraalkaan ka aqrisan kartaa warbixin xilhaayaha xannaanadda/waalidka loogu tala-galay. Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad oo ku saabsan gaadiidka iskuullada, nidaamyada musaafadda xiriir la leh ama qaabka go'aan arrinta looga gaaro, ka aqriso barta internetka: [www.vaxjo.se/skolskjuts.se](http://www.vaxjo.se/skolskjuts.se)**

## **Qaabka mas'uuliyadda loo kala qaybsaday**

Waalidiinta waxay ilmaha mas'uul ka yihiin ilaa gaadiidka iskuulka ay kaga fuulaan maxatada la shaaciyay in gaadiidka ay ka fuulaan, iyo laga bilaabo goorta ay gaadiidka kaga degan maxatada la shaaciyay in ay gaadiidka ay kaga degaan kaddib markii u iskuulka dhamaado.

Shirkadda gaadiidka waxay ballanqaadaysa, in wadaha gaadiidka u ardayda mas'uul ka yahay markii gaadiidka ay saaran yihiin iyo in u tixgeliyo nidaamyada traafikada ee hirgaleen. Dhacdooyinka xiriirka la leh gaadiidka iskuullada, sida dhacdo ama fal meelkadhac ku salaysan waxaa xaaladdaas mas'uul ka ah in agaasimaha dugsiga u arrinta baaro.

## **Nidaamyada amniga**

Ardayda isticmaala gaadiidka iskuullada waxaa hab joogto ah, la siiyaa tababar ku saabsan hab-dhaqan wanaagga iyo nidaamyada amniga iyo mid xiriir la leh sida loo dhaqmo haddii dabkac u jiro. Waa in hab xasilan gaadiidka ugu degaan. Ardayda waa in hab xasilan u fadhiyaan xilliga socdaalka. Waa in suunka amniga [Säkerhetsbält] ay isticmaalaan.

## **Habsaamidda ama haddii gaadiidka iskuullada la waayo**

Haddii ay jirto habsaamidda ama la waayo gaadiidka iskuullada, sidii hadba loogu heshiiyay, waxaa khadka taleefanka lagala xiriiri karaa oo la waydiin karaa miiska macaamiisha ee Taraafikada Gobolka [Länstrafiken], tal 0771-76 70 76. Gaadiid beddelkiisa ah ayaa sida ugu dhaqsida badan la soo diri doonaa.

## **Gaadiidka subaxdii**

Haddii gaariga gaadiidka iskuullada u soo habsaamo in 30 daqiiqo ka badan, waa in guud ahaan ardayga u gurigiisa ama goob waalidkiisa kula taliyay ku laabto.

## **Gaadiidka gelinka dambe**

Ardayda waa in shaqaalaha iskuulka la xiriiraan, kuwaaso iyaguna la xiriiri doono hawlwadeneyaasha Taraafikada Gobolka. Ardayga waa in uu iskuulka iska joogo, ilaa iskuulka la keeno baabuur kale.

## **Nidaamyada hab-dhaqamada u degsan**

Ardayda waa in xilliga socdaalka aynan ka dhaqaaqin boosaskooda, oona sugaan ilaa u gaariga ka istaago halka ay ugu degi lahaayeen.

Ardayda ku qasban in wadadda ay dhexmaraan, waa in ay sugaan ilaa u gaariga halkaas ka dhaqaaqo. Ardayda waa in dheg u dhigaan oona tixgeliyaan tilmaan-bixinada wadeha gaadiidka. Wadeha waa in hagayaasha traafikada u wargeliya dhacdooyinka aan waafaqsanyn nidaamyada hirgaleen.

Ardayga baaskiil ku taga halka u gaadiidka iskuulka laga qaato, waa in baaskiilkiisa qaab aan xayiraad u noqon dadka lugaynayo ama traafikada kale u meel ugu habeeyaa.

Qofka ama dadka waxyeello gaariga gaadiidka iskuullada waa in u bixiya kharashka lagu dayactiri doono wixii u kharibay. Dhacdada waxyeello kasta waxaa la wargeliya ciidanka booliska.

## **Ku saabsan gaadiidka saaxiibka [Kompisåkning]**

Arrimaha gaadiidka saaxiibka [Kompisåkning] waxaa maareeyo maamuleha iskuulka ee arrinta khuseeyso. Warbixin dheeraad darteed la xiriir shaqaalaka iskuulka.

Wadajir ayaan u sugi karnaa amniga wadadda iskuulka! Waa arrin aad muhim u ah in adiga oo ah qof waalid aad ubadkaaga kala doodo warbixinta qoraalkan ku qoran, taasoo suurtagelin doonto in dhammaan ardayda isticmaala gaadiidka ka warqabaan oona tixgeliyaan.

Skolskjutsfrågor Wixii su'aallo ah waxaa ka jawaabo gacanhayaha gaadiidka iskuullada: 0470-410 00, [skolskjutsgruppen@vaxjo.se](mailto:skolskjutsgruppen@vaxjo.se) , [www.vaxjo.se/skolskjuts](http://www.vaxjo.se/skolskjuts).



**Växjö  
kommun**